Mawduuca: Xeerka Caafimaada Dhaqaalaha ee Kadlec Regional Medical Center (Deeqda Daryeelka)	**Lambarka Caymiska:** PSJH RCM 002 Kadlec	
Waaxda: Maamulka Mareegta Dakhliga	☒ Cusub ☐ Lacusboonaysiiyay ☐ Dib loo eegay	**Taariikhda:** 3/22/2019
Maalgaliyaha Fulinta: Kimberly Sullivan, Madaxa Mareegta Dakhliga ee SVP	**Mulkiilaha Caymiska:** Lesa Ellis, Talobixinta iyo Caawimaada Dhaqaalaha Dir	
Waxaa ansixiyay: Gudigga Agaasimayaasha PSJH	**Taariikhda Dhaqan galinta:** 5/1/2019	

Kadlec Regional Medical Center ("Kadlec") waa urur khayri ah oo caafimaadka kashaqaysa Kuna taagan dadaalka Shaqadda, iyo Mabaadii'deeda aasaasiga ah, iyo fikirka ah in daryeelka caafimaadku ee xaaq banii'aadanimo. Waa mabda'a iyo shaqada Kadlec in adeegyada degdega ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah ay diyaar unoqdaan dadka kamid ah bulshooyinka aan u adeegno, ayadoon laga eegayn inay qarashka iskadhiibi karaan iyo inkale.

XAJMIGA SHAQADA:

Xeerkaan wuxuu qabanayaa dhamaan Kadlec iyo adeegyadeeda degdega ah, boobsiiska ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiso Kadlec (marka laga reebo daaryeelka tijaabada ama baaritaanka ah).

Xeerkaan waa in loo fasiraa qaab waafaqsan Qaybta 501(r) ee Sharciga Dakhli Aruurinta Gudaha ee 1986, sida loo badalay. Markay iskahor yimaadaan fulinta sharciyada noocaas ah iyo xeerkaan, sharciyada noocaas ah ayaa laraacayaa.

UJEEDADA:

Ujeedada xeerkaan waa in laxaqiijiyo sinaanta, takoor la'aanta, waxgalka, iyo nidaamsanaanta qaabka bixinta adeegyada Caawimaada Dhaqaalaha (Deeqda Daryeelka) lana siiyo shaqsiyaadka aan awoodin inay dhiibaan dhamaan ama qayb ahaan adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah ee degdega ah iyo adeegyada isbitaalka e Kadlec bixiso.

Waa hadafka xeerkaan in lagu dhaqmo dhamaan sharciyada heer federaal, heer gobal, iyo heer deegaan. Xeerka iyo barnaamijyada caawimaada dhaaqaaluhu waxay halkaan kacadaynayaan kudhaqanka Xeerka Rasmiga ah ee Caawimaada Dhaqaalaha ('FAP') iyo Xeerka Daryeelka Caafimaadka Degdega ah ee Kadlec.

XEERKA:

Kadlec waxay siinaysaa adeegyada isbitaalka oo bilaash ah ama qiimo jaban leh bukaanada danyarta ah, aan caymiska lahayn iyo kuwa caymiska kufilan aan haysan marka awooda dhiibista qarashaadka adeegyadu ay caqabad kunoqoto helitaanka adeegyada degdega ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah iyo iyo daryeelka kale ee isbitaalka aana haysan il kale oo lacagta kabixisa oo la aqoonsaday. Bukaanadu waa inay buuxshaan shuruudaha uqalmida ee kuqeexan xeerkaan si ay deeqda ugu qalmaan.

Kadlec oo leh waaxyo uqaas ah arimaha degdega ah ayaa bixinaysa daryeel, kacaagan takoorka, oo lagu daawaynaayo xaaladaha caafimaad ahaan degdega ah (sida kucad macnaha Sharciga Daawaynta Caafimaadka Degdega ah iyo Shaqaalaha) kaasoo waafaqsan adeegyada laheli karo, ayadoon laga eegayn in qofku uu uqalmo caawimaad dhaqaale iyo inkale. Kadlec cidna uma takoorayso sababo kudhisan da'da, isirka, midabka, caqiidada, qoomiyada, diinta, wadanka qofku kasoo jeedo, xaaladiisa guur, jinsigiisa, dookhiisa galmo, jinsiyadiisa shaqsiyadeed ama dareenka qfka, naafonimo, aqoonsigiisa halyeeynimo ama milatari, ama sababo kale oo kasta oo uu xarimaayo sharciga federaalka, kan gobalka, ama kan deegaanku markaan gaarayno go'aanada laxariira caawimaada dhaqaale.

Kadlec ayaa siin doonta baaritaanka caafimaad ee degdega ah iyo daawo xanuunka lagu damiyo, ama gudbinaysa wareejinaysana qofka hadii wareejinta noocaas ah ay tahay mid haboon sida waafaqsan xeerka 42 C.F.R 482.55. Kadlec waxay mamnucaysaa talaabooyin kasta, shaqooyinka aqbalaada bukaanka, ama xeerar kahor istaagaaya shaqsiyaadka inay daryeelka caafimaad ee degdega ah dalbadaan, sida ogolaanshaha shaqooyinka aruurinta daynta kuwaasoo caqabad ku ah bixinta daryeelka caafimaad ee degdega ah.

Liiska Khubarada Kashaqeeya Kadlec Regional Medical Center FAP: Kadlec waxay si gaar ah u aqoonsanynasaa liiska dhakhaatiirtaas, kooxahaas caafimaadka, ama khubarada kale ee bixinaaya adeegyada kuwaasoo iskugu jira kuwo caymiskaan kujira iyo kuwo aan kujirin. Kadlec waxay siin doontaa liiskaan bukaan kasta oo codsada in nuqul laga siiyo. Liiska adeeg bixiyaasha waxaa sidoo kale kahelaysaa oonleen ahaan barta Kadelc: www.kadlec.org.

Shuruudaha qalmida Caawimada Dhaqaale: caawimaada dhaqaale waxaa heli kara labadaba bukaanada caymiska leh iyo kuwa aan caymiska lahayn wuxuuna balan qaadayaa in caawimaada noocaas ah ay waafaqsan tahay xeerkaan iyo sharciyada federaalka iyo kuwa gobalka oo maamulaaya siinta gunooyin la ogolyahay bukaanada. Kadlec waxay samayn doontaa dadaalo macquul ah si ay go'aan uga gaarto xaquujinta jiritaanka qolo saddexaad oo qarashaadka bukaanka kadhiibta ama inaysan jirin, taasoo wada daboolaysa qarashka ama qayb kabixinaysa, daryeelka ay bixiso Kadlec, kahor intaan laqaadin talaabo lacagta loogasoo aruurinaayo bukaanka.

Bukaanada doonaaya in caawimaad dhaqaale lasiiyo waa inay buuxshaan Codsiga Caadiga ah ee Caawimaada Dhaqaalaha ee Kadlec dadka uqalmana waxaa lagu go'aaminayaa si waafaqsan baahidooda dhaqaale taariikhda adeegga lasiiyay ama taariikhda ay codsiga dirayaan, hadba sidii haboon. Bukaanada ayaa mar labaad codsan kara caawimaada hadii xaaladooda dhaqaale kasii darto muddo kadib, xataa hadii codsigii hore lagasoo diiday ama qayb ahaan la aqbalay. Dadaalo macquul ah ayaa lasamayn doonaa si loo ogaysiiyo loona wargaliyo bukaanada helitaanka caawimaad dhaqaale ayadoo lasiinaayo macluumaadka marka isbitaalka lakeeno iyo marka isbitaalka laga saaraayo, waxaa lasiinayaa macluumaad qoran oo laxariira biilka lacag aruurinta, meel biilka ay ka arki karaan bukaanku ama aaga adeegyada dhaqaalaha, webseetka isbitaalka, ogaysiis hadal ah inta lagu jiro dooda laxariira dhiibista qarashka, iyo sidoo kale boor lagusoo dhajiyo meelaha ay dadka bukaan jiifka ah iyo kuwa bukaan socodka ahba ujeedaa, sida waaxda qorsta bukaanka iyo xaaladaha degdega ah. Turjumaadaha waxaa lagu heli karaa luuqad kasta oo ay kuhadlaan wax kabadan toban boqolkiiba bulshada kudhaqan aaga adeegyada isbitalaku gaaraan. Kadlec waxay haysan doontaa macluumaadka loo adeegsaday go'aaminta uqalmida caawimaada si waafaqsan xeerarka haynta diiwaanada.

Codsashada Caawimaad Dhaqaale: bukaanada ama dadka damaanada ka ah waxay codsan karaan ayna gudbin karaan Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, kaasoo lacag la'aan ah lagana heli karo Kadlec ama lagu heli karo qaababka soosocda: usheegista shaqaalaha adeegyada dhaqaalaha bukaanka marka lagaaro ama kahor xiliga lagaa saaro isbitaalka in caawimaad aad codsatay aadna gudbiso codsiga oo ay lasocdaan dhamaan dukumiintiyadu; adoo kusoo dira boostada, ama booqda www.kadlec.org,soona dagsanaaya kadibna gudbinaaya codsiga aad buuxisay oo ay lasocdaan dukumiintiyo. Qofka codsanaaya caawimaada dhaqaale waxaa lasiinayaa baaritaan horudhac ah, kaasoo ay kujiri doonaan dib u eegista in bukaanu uu waayay ama uusan uqalmin ilaha qarash bixinta oo kayimaada qolo saddexaad.

Kadlec ayaa udiyaarin doonta shaqaalaha loogu talagalay inay kacaawiyaan bukaanada buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo go'aaminta uqalmida caawimaada dhaqaale ee Kadlec ama caawimaad dhaqaale oo aad kahesho barnaamijyada caymiska ay dawladu maalgaliso, haddii aad heli karto. Adeegyada turjumaadu waa diyaar si looga jawaabo su'aalo kasta ama walaacyo aad qabto lagaagana caawiyo buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

Bukaanka ama qofka damiinka ka ah kaasoo xaq uyeelan kara inuu codsado caawimaad dhaqaale ayaa ukeeni kara dukumiintiyo dhamaystiran Kadlec Regional Medical Center si dkumiintiyadu utaageeraan go'aaminta uqalmida caawimaada xiligii ladoono marka la ogaado in dhaqaalaha qofku uu kujiro laynka faqriga kahooseeya ee FPL si waafaqsan shuruucda Federaalka iyo Gobalka.

Kadlec waxay xaqiijinaysaa si waafaqsan Washington Administrative Code (WAC, Sharciga Maamulka ee Washington) 246-453-020, go'aanka laxariira uqalmida caawimaada in lagaari doono marka la ogaado in dhaqaalaha codsaduhu kahooseeyo 200% heerka ay dawlada federaalu kudajisay faqriga. Waxaa intaas siidheer, Kadlec waxay dooran kartaa inay caawimaad dhaqalae kubixiso si kaliya kudhisan go'aamin hore oo laga gaaray xaalada bukaanka oo loo aqoonsaday inuu yahay qof faqiir ah, sida kucad xeerka WAC 246-453-010. Markay xaalad noocaan ah jirto, dukumiintiyo ayaa loobaahan karaa.

Xaalada Dhaqaale ee Qofka: Dhaqaalaha, hantida lacagta laxariirta iyo qarashaadka kubaxa bukaanka ayaa loo adeegsanayaa qiimaynta xaalada dhaqaale ee shaqsiga ah ee bukaanka. Sababo laxariira barnaamijka FAP, Washington waxay kuqeexaysaa dhaqaale iyo qoysk si waafaqsan xeerka WAC 246-453-010. Hantida lacagta laxariirta lagumasoo dari doono lacagta hawlgabka iyo caymisyada magdhawga dib loodhigay kuwaasoo lagu helo Xeerka Dakhliga Gudaha walaa caymisyada magdhawga aan ladib dhigay ee aan bukaanku uqalmin. Hantida lacagta laxariirta looma adeegsan doono kago'aan gaarista uqalmida hadii dhaqaalaha soogala bukaanka ama qofka damiinka ka ah uu kudhan yahay ama kahooseeyo 200% heerka faqriga federaalka.

Shuruudaha Dhaqaalaha: Shardiga dhaqaalaha, oo lagu salaynaayo Federal Poverty Level (FPL, Heerka Faqriga Federaalka), ayaa loo adeegsan karaa in lagu go'aansho uqalmida daryeel bilaash ah ama raqiis ah. Fadlan kafiiri Liiska A wixii faahfaahin ah.

Go'aaminta iyo Ansixinta: bukaanadu waxay helayaan ogaysiiska go'aanka uqalmida FAP 14 maalmood gudahood laga bilaabo markay soodiraan codsiga Caawimaada Dhaqaalaha oo dhamaystiran iyo dukumiintiyada muhiimka ah. Marka codsigu nasoo gaaro, dadaalada dheeriga ah ee lacagta lagaaga aruurinaayo ayaa lajoojinayaa ilaa go'aan qoran oo laxariira uqalmida caawimaad dhaqaale loodiro bukaanka. Isbitaalku magaaraayo go'aan laxariira uqalmida caawimaada ayadoo lagu salaynaayo macluumaad uu isbitaalku aaminsanyahay inuu khalad yahay ama aan lagu kalsoonaan karin.

Xalinta Khilaafka: Bukaanku wuxuu racfaan kaqaadan karaa go'aanka laga gaaro uqalmidiisa caawimaada dhaqaalaha asagoo keenaaya dukumiintiyo dheeri ah oo laxariira isbitaalka muddo 30 maalmood gudahood ah kadib marka uu kusoo gaaro ogaysiiska diidmada ah. Dhamaan racfaanada dib u eegis ayaa lagu samaynayaa haddii dib u eegistu xaqiijiso diidmadana, ogaysiis qoran ayaa loodirayaa qofka damaanada ka ah bukaanka iyo State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobalka), markii loobaahdo, oona waafaqsan sharciga. Hanaanka racfaanka kama danbaysta ah wuxuu soo dhamaanayaa 10 maalin gudahood marka uu kusoo gaaro ogaysiiska diidmada isbitaalku. Racfaanka waaa loodiri karaa Kadlec, Attn: PFS, 888 Swift Blvd, Richland, WA 99352.

Deeqda Kaalmaati ah: Kadlec waxay u ansixin kartaa bukaanka caawimaad dhaqaale oo lagu siiyo qaabab kaduwan codsiga caawimaada dhaqaale ee buuxda. Go'aannada noocaas ah waxaa lagu samaynayaa qaab kaalmaati ah ayadoo la adeegsanaayo qaab qiimaynta dhaqaalaha ah oo isbitaalku aqoonsan yahay kaasoo qiimaynaaya awooda dhiibista qarashaadka ayadoo lagu salaynaayo diwaanada dhaqaalaha ee bulshada ama diiwaanada kale, ayna kujiraan laakiin aan kukoobanyn dhaqaalaha qoyska, tirada qoyska, iyo taariikhda daynta iyo qarash bixinta.

Xaalada kale ee Gaarka ah: Bukaanada uqalma caawimaada FPL-barnaamijyada uqalma sida Medicaid iyo barnaamijyada kale ee caawimaada dawladu siiso dadka danyarta ah, ayaa loo aqoonsan yahay inay yihiin kuwo fakhri qaba. Sidaas awgeed, bukaanada noocaas ah waxay uqalmaan Caawimaad Dhaqaale marka barnaamijyadu diidaan bixinta qarashkooda loona arko in qarashaadku yihiin kuwo laga dhiibi karo bukaanka. Baaqiga koontada bukaanka ee laxariira qarashaadka aan loocelin bukaanka ayaa xaq uleh deeqda caawimaad buuxda. Kuwa sida gaarka ah ugu jira kuwo uu bukaaku uqalmo ayaa ah qarashaadka laxariira adeegyada soosocda:

- Joogitaanada bukaan jiifka ee loodiiday bukaanka
- Maalmaha bukaanka loodiiday inuu daryeelka bukaan jiifka helo
- Adeegyada aan Caymiska kujirin
- Diidmooyinka Codsiga Ogolaanshaha Hore
- Diidmooyinka kadhasha caymis xadidan

Qarashaadka Caafimaadka kubaxa oo Xad dhaaf ah: Kadlec, ilaa intay awoodo, ayaa caawimaad kasiin karta bukaanka qarashaadka caafimaadka kubaxa ee xad dhaafka ah. Bukaanada noocaan ah waxaa loola dhaqmayaa si shaqsi ah.

Xadidida Qarashaadka Laga qaadayo Dhamaan Bukaanada Uqalma Caawimaada Dhaqaalaha: Majiro bukaan uqalma wax kamid ah qaybaha kor kuxusan ee caawimaada oo si shaqsi ah udhiibaaya wax kabadan "Cadadka Caadiyan Labaxsho" (AGB) ee boqolkiiba qarashaadka guud, sida hoos kucad.

Qorshaha Qarash Bixinta ee Macquulka ah: Marka bukaanka loo ogolaado caawimaada dhaqaale ee qaybta ah, laakiin wali lagu leeyahay baaqiga, Kadlec ayaa wada hadal kala galaysa qorshe lacagta tartiib loogu dhiibo. Qorshaha lacag bixinta macquulka ah waxaa kujiri doona qarashaadka bilkasta ladhiibaayo kuwaasoo aan kabadan karin 10 boqolkiiba dhaqalaaha bishii soogala bukaanka ama qoyska, marka laga reebo qarashaadka loogoosto Qarashaadka Kubaxa Aasaasiyaadka Nolosha kuwaasoo uu bukaanku kuqoray codsigigiisa caawimaada dhaqaalaha.

Biilka iyo Aruurintiisa: Baaqiyo kasta oo aan ladhiibin oo lagu leeyahay bukaanada ama damiinadooda kadib markii loosameeyay qiimo dhimisyada laheli karo, haddii ayba jiraan, ayaa la amri kara ain lagasoo qaado bukaanka. Dadaalada aruurinta baaqiyada aan wali ladhiibin waxay meesha kasaarayaan go'aanka kama danbaysta ah ee rahman ee uqalmida FAP. Kadlec ma samaynayso, mana ogolaanayso ama uma ogolaanayso wakaaladaha dayn aruurinta inay sameeyaan wax talaabooyin lacag aruurin ah oo qayru caadi ah kahor intaan: (a) lasamayn dadaalo macquul ah oo lagu go'aaminaayo in bukaanku uqalmo caawimaad dhaqaale iyo in kale; ama (b) 120 maalmood kadib marka bayaanka koobaad ee bukaanka lasoo diro. Wixii macluumaad ah oo laxariira biil bixinta Kadlec iyo talaabooyinka aruurinta lacagaha lagu leeyahay bukaanka, fadlan kafiiri xeerka Kadlec, kaasoo aad si bilaash ah uga helayso xafiis kasta oo diiwaangalinta uqaabilsan Kadlec, ama bogga: www.kadlec.org**.**

Lacag Ucelinta Bukaanka: Marka bukaan ama damiinka bukaanku uu bixiso qarashaadka adeegyada kadibna hadhow la go'aansho inuu xaq uleeyahay daryeel bilaash ah ama qiimo jaban, wixii qarashaad ah oo lagu baxshay adeegyadaas intii lagu jiray muddada uu xaqa ulahaa FAP qarashkaasoo kabadan kii waajibka ku ahaa waa loo celinayaa bukaanka, si waafaqsan sharciyada gobalka.

Dib u eegista Sanadlaha ah: Xeerkaan Caawimaada Dhaqaalaha ee Kadlec (Deeqdaha Daryeelka) si sanadle ah ayaa dib u eegis loogu samaynayaa waxaana baaraaya Hogaamiye loogu talagalay oo Mareegta Dakhli aruurinta Kamid ah.

WAXYAABAHA REEBAN:

Fiiri cabirka kore.

QEEXITAANADA:

Sababo laxariira xeerkaan qeexitaanada soosocda iyo shuruudaha ayaa qabanaaya:

1. Federal Poverty Level (FPL): FPL waxaa looga jeedaa tusmooyinka heerka faqriga oo kujira Diiwaanka Federaalka ee United States Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Maraykanka).

2. Cadadka Caadiyan Biilka Lagu diro (AGB):Cadadka caadiyan labiil gareeyo ee daryeelka xaalada degdega ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah lana siiyo bukaanka haysta caymiska caafimaad ayaa looyaqaanaa gudaha xeerkaan AGB. Kadlec ayaa go'aamisa boqoleeyda AGB ee kuhabboon bukaanka ayadoo iskudhufanaysa qarashaadka guud ee isbitaalku bukaanka uga qaado daryeel kasta oo degdeg ah ama caafimaad ahaan muhiim ah ayadoo adeegsanayna boqoleey go'an kaasoo kudhisan caymiska loogu ogolyahay bukaanka barnaamijka Medicare. Xaanshida macluumaadka oo sharaxaysa boqoleeyda loo adeegsado AGB, iyo sida loo xisaabsho, ayaad heli kartaa adoo booqanaaya webseetka soosocda: www.kadlec.org ama adoo wacaaya **1-509-942-2626** si aad koobi ucodsato.

3. Talaabada Lacag Aruurinta Qayru Caadiga ah (ECA): ECAs ayaa lagu qeexaa talaabooyinka ubaahan hanaan sharci ama amar garsoor, taasoo laxariirta in dayn laga iibsho qolo saddexaad ama in loosheego macluumaad xun wakaaladaha daynta baxsha ama laamaha. Talaabooyinka ubaahan hanaan sharci ama garsoor ee ujeedadaan quseeya waxaa kamid ah lawareegida hantida; iibinta hantida maguurtada ah ee bukaanka; maamulida ama lawareegida koontadiisa bangiga ama hantida kale ee shaqsiga ah; qaadista talaabo sharci oo madani ah oo kadhan ah qofka; talaabooyin keenaaya in qofka xabsiga lootaxaabo; talaabooyin keenaaya in qofka waardiye ladaba dhigo; iyo lwareegida mushaarkiisa.

TIXRAACYADA:

Xeerka Akhliga Gudaha Farqada 501(r); 26 C.F.R. 1.501(r)(1) – 1.501(r)(7)
Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington) (WAC) Chapter 246-453
Revised Code of Washington (RCW, Sharciga Wax laga Badalay ee Washington) Cutubka 70.170.060
Emergency Medical Treatment and Labor Act (EMTALA, Sharciga Daawaynta Caafimaadka Degdega ah iyo Shaqaalaha), 42 U.S.C. 1395dd
42 C.F.R. 482.55 iyo 413.89
Tilmaamaha American Hospital Associations Charity (Deeqda Ururka Isbitaalada Maraykanka)
Tilmaamaha Providence St. Joseph Health Commitment to the Uninsured (Dadaalka Caafimaadka Dadka aan Caymiska Lahayn ee Providence St. Joseph)
Provider Reimbursement Manual (Buuga Qarash Celinta Adeeg Bixiyaha), Qaybta I, Cutubka 3, Farqada 312

Bandhiga A – Liiska Xarumaha Caymiska kujira

Kadlec Regional Medical Center (Xarunta Caafimaadka Gobalka ee Kadlec)

Bandhiga B - Shuruudaha Dhaqaalaha ee Kadlec

Waqtiyaynta Go'aanada Laxariira Dhaqaalaha: Dhaqaalaha sanadkii soogala qoyska bukaanka ayaa go'aan laga gaarayaa marka adeegyada isbitaalka labaxsho, ama xiliga codsiga hadii codsiga lasoo diray labo sano gudahood kadib marka adeegyada labaxsho bukaankuna uu samaynaayay dadaalo daacad ah oo ku aadan bixinta qarashaadka adeegyada.

Hadii...	**Kadibna ...**
Dhaqaalaha sanadlaha ah ee qoyska, tirada xubnaha qoyska, uu kujiro heerka ama kahooseeyo 300% ee tusmooyinka faqriga hadda udagsan dawlada ee FPL.	In bukaanka la go'aansho inuu dhaqaale ahaan faqiir yahay, uuna xaq uyeesho caawimaad dhaqaale oo 100% laga dhaafaayo cadadka waajibka ku ah bukaanka.[1]
Dhaqaalaha sanadlaha ah ee qoyska, tirada xubnaha qoyska, uu kujiro heerka fakhriga FP oo ah inta udhaxaysa 301% iyo 350% sida kucad tusmooyinka hadda jira.	Bukaanku uu xaq uyeesho qiimo dhimis dhan 75% qarashaadkii hore ee waajibka ku ahaa in bukaanu baxsho.
Haddii dhaqaalaha sanadlaha ah ee qoyska, tirada xubnaha qoyska, ay tahay ama kahoosayso 350% heerka faqriga ee FPL IYO bukaanku uu baxshay uu dhiibay dhamaan qarashaadka adeegyada uu kahelay xarunta Kadlec Regional Medical Center 12 bilood kahor uuna baxshay 20% lacag dheeri ka ah lacagta dhaqalaaha sanadkii soogala qoyskooda, ama qarashka kujira tirada xubnaha qoyskooda, kuna baxshay adeegyo kujira xerkaan.	Bukaanka ayaa xaq uleh guno deeq ah oo dhan 100% cadadka laga doonaayo inuu baxsho bukaanku.

[1] Si waafaqsan xeerka WAC Ch. 246-453, marka laxaqiijiyo in shaqsiyaadka noocaas ah aysan uqalmin caawimaad ay kahelaan qolo saddexaad oo kale (kafiiri RCW 70.170.020(5)70.170.060(5)).